



Ogoosto 20, 2020-ka

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka wuu aqoonsan yahay dhibaatooyinka dad badan oo qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo qoysaskooda ka soo wajahday dugsiga internet-ka/meesha fog laga dhiganayo iyo joogtaynta qoyska iyo nolasha shaqo inta lagu jiro cudurka baahsan .

Sababtani awgeed, saacadaha wakhtiga xagaaga ee ku qoran Qiimeynta Baahiyaha Carruurta (CNAs) waa kuwo dhaqan gal ah ilaa laga helayo ogeysiin dheeraad ah kuwaasi oo loogu talagalay carruurta helaysa adeeyada guriga dhexdiisa.

Saacadaha adeeg bixiyaha waxaa la isticmaali karaa wakhti kasta oo maalintii ka mid ah sida ay hadba go'aamiyaan waalidka/mas'uulka ilmuhu, iyadoo ay ugu wacan tahay xaalada gaarka ah ee sanad dugsiyeedkan.

Adeeg bixiyaha waxaa loo isticmaali Hawsha Nolol Maalmeedka (ADL) iyo Hawlaha Nolol Maalmeedka Muhiimka ah (IADL) oo kasta, hawlaha la xiriira caafimaadka, ama taageerada hab-dhaqanka ee lagu aqoonsaday ISP carruurta. Adeeg bixiyaha ma ahan in loo adeegsado hawlaha waxbarasho ama dugsiga guriga.

Qoysasku waa in ay la hadlaan Isku duwahooda Adeegyada wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan qiimeynta saacadaha wakhtiga xagaaga. Waxaan rajeynaynaa in tani bixiso waxoogaa taageero ah in ta lagu jiro wakhtiga adag.

Waad ku mahadsan tihiin wax kasta oo aad sameyso si loo taageero dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.